Talooyin Loogu Talagalay Milkiileyaasha leh Hantida Guryaha iyo Guri Kiraystayaasha ee Ku Saabsan Faylgareenta/Xereyta Sheegashada Caymiska

Isla markiiba khasaaraha ka dib

Islamarkiiba khasaaraha ka dib, waxaa jira tillaabooyin aasaasi ah oo aad qaadan karto si aad u qaado waddada ka soo kabashada. Tallaabada ugu horreysa ayaa ah inaad **wacdo wakiilkaaga caymiska** oo aad ka siiso warbixin khasaarada (milkiile guri, kireystayaasha ama gaariga). Haddii aadan haysan wakiil, markaa waxaad **wacdaa shirkaddaada caymiska** si aad uga warbixiso khasaaraha.

Ka dib marka aad ka warbixiso khasaaraha, qaado tillaabooyinkan:

- Hubso in meesha ay amaan iyo amni tahay. Naftaada ha gelin khatar haddii aysan mas'uuliinta amniga maxalliga aysan oggolaan in dadweynaha galaan meesha.
- Haddii qaab dhismeedka uu yahay amaan in lagalo, demi/jar korantada.
- Kahor inta aadan bilaabin nadiifinta, ka qaad meesh sawirro ama ka duub fiidiyow si aad u diiwaangeliso inta uu burburku la eg yahay. Waa wax aad muhiim u ah in **la diiwaangaliyo dhammaan burburka.**
- Iska ilaali inaad wax walba tuurto (oo aan ka aheen cuntada xumaani karta) ilaa aad la kulantid hagaajiyaha/qiimeeyaha caymiska. Waxay kaa caawini doonaan go'aaminta waxa la tuuri karo.
- Samee dayactir ku meelgaar ah, oo qiimo jaban si aad uga hortagto burbur kale oo soo gaara gurigaaga/hantidaada. Tusaale ahaan, Looxyo ku xir daaqadaha burburay ama saar bac dusha saqafka ay waxyeelo gaareen. Haddii kale, waxaa laga yaabaa burbur dheeraad ah inaysan daboolin siyaasaddaada caymiska. Hayso risiidada alaabta aad soo iibsatay, si laguugu soo celiyo kharashka kaa baxay.

Xereynta/Faylgareenta sheegasho

- **Ula xiriir shirkaddaada caymiska si deg deg ah** si aad uga warbixiso khasaaraha oo raac tilmaamaha ay ku siiyaan shaqaalaha sheegashada caymiska.
- **Gacanta ku hay lambarka siyaasaddaada caymiska iyo sheegashadaada.** Tani waxay ka caawini doontaa qaab-socodka sheegashada inay si dhakhso leh u socoto.
- **Qor wax walba.** Heyso diiwaangelin ah qofka aad la hadashay iyo goorta aad la hadashay, oo ay ka mid tahay soo koobitaanka wada hadalkiina oo weydii su'aalo haddii aadan fahmin tilmaamaha.
- **Samee liisto ah alaabta guriga**. Isticmaal kamaradda taleefonkaaga gacanta inaad ka duubto fiidiyow ama ka qaado sawiro gurigaaga iyo xoolahaaga haddii ay suurtagal tahay. Haddii aadan hore u haysan liisto alaabta gurigaaga ama aad awoodi waydey inaad mid samayso ka hor inta aadan guriga ka ordin, samee liisto ah waxyaabaha badankood oo aad xasuusan karto.

- **Sug qiimeeyaha shirkadda inuu yimaado**. Ha wicin cidna si ay u hagaajiyaan/dayactiraan ama beddelaan khasaarahaada adoon marka hore ka helin tilmaamo qiimeeyaha shirkadaada caymiska. Caymiskaaga wuxuu u baahan karaa inuu muuqaal ahaan u baaro khasaarahaada ka hor inta aan dayactirka la samayn. Ha tuurin hantida burburtay illaa uu kugu yiraahdo qiimeeyaha shirkaddaada waad sameen kartaa sidaa. Samee kaliya dayactir ku meel gaar ah si aad uga hortagto burbur hor leh illaa uu qiimeeyaha sheegashada uu yimaado si uu u baaro.
- **Is abaabul.** Soo qaado nuqul/koobi dhammaystiran oo ah siyaasaddaada caymiska ama heshiiskaaga /qandaraaskaaga caymiska. Uruuri wixii diiwaano ah oo caddayn kara qiimaha alaabta/qalabyada burburay, sida risiidada iibsashadooda.
- **Hayso diiwaan ah kharashyada** kaa baxay iyo xiriiryada aad la sameysay shirkadda caymiska.

La shaqeynta qiimeeyaha shirkadda caymiska

Fadlan la soco in khayaanoolayaasha ay ka faa'iideysan karaan xaaladaha si ay isugu dayaan inay khiyaaneeyaan milkiilayaasha guryaha. Waxaa jira tillaabooyin aad qaadan karto si aad isugudaydo oo aad isaga ilaaliso halistaas.

Qiimeeyaha shirkad ayaa baari doona hantidaada ama gurigaaga si uu u qiimeeyo burburka hore. Hubso inaad weydiiso qiimeeyaha:

- Kaarka shaqada/ganacsiga ama karka aqoonsiga
- Macluumaad ku saabsan waxa lagaa rabo inaad sameyso muddada xigta
- Macluumaad ku saabsan waxa ay shirkaddu sameyn doonto muddada xigta
- Tilmaamaha sida loo helo qiyaasta kharashka ku baxa dayactirka. Caddee haddii aad adigu mas'uul ka tahay ama haddii shirkaddu ay samayn doonto iyada oo adiga ku mataleysa
- Qiyaasta wakhtiga ee uu qiimeeyaha filayo inay qaadan hab-waxqabadka hishiis-kagaarka sheegashada
- Kharash-baxa nolosha ee dheeraadka ah. Haddii aadan awoodin inaad gurigaaga sii joogtid, qiimeeyaha wuxuu bixin karaa lacag hormaris ah oo loogu talagalay kharasha-baxa nolosha ee ku-meel-gaarka ah. Isticmaalka lacagta uma lahaan doono wax saameyn ah hishiis-kagaarkaaga caymiska ee ugu dambeeya. Laakiinse, waa inaad haysataa risiidada dhamaan kharash-baxa dheeraadka ah ee kugu soo dalacmo inta uu gurigaagu aan la daggi karin.

La shaqeynta qiimeeye dadweynaha

Hal ikhtiyaar ayaa ah inaad kireysato qiimeeye dadweyne si uu kaa caawiyo diiwaangelinta khasaaraha. Qiimeeyaha dadweyne wuxuu kaa noqon karaa wakiil marka lala wada-hadlayo/lala gorgortamayo qiimeeyaha shirkadaada caymiska caadi ahaana waxaa laga siiyaa boqolkiiba wax heshiis-gaarka caymiska ee ugu dambeeya. Lagaagama baahna inaad lashaqeeysid hagaajiye dadweyne.

Kahor inta aadan kireysan qiimeeye:

- Hubi haddii ay ka diiwaangashan yihiin Waaxda Ganacsiga Minnesota ama haddii ay layhiin wax talaabo edbin ah oo hore.
- Samee/Hel heshiis/qandaraas qoraal ah oo si cad ah u tilmaamaya dhammaan kharashyada kaa baxaya.
- Go'aanso haddii aad u maleyneyso in caawinta qiimeeyaha ay kaa caawini doonto inaad soo ceshato lacag ku filan si aad u daboosho kharashyada kaa baxa.

Iska ilaali qiimeeye ah:

- Mid sheeganaya inuu ka socda hay'ad dawladeed.
- Mid ku adkaysanayo in adeegiisa waajib/qasab yahay.
- Mid isticmaala xeelado qancinta iibinta ee cadaadiska sare leh.
- Mid diida inuu bixiyo heshiis/qandaraas qoraal ah.

Haddii sheegashadaada la diido

Marka hore, dib u eeg shuruudaha daboolista caymiskaaga. Siyaasaddaha waa wax aad u khaas ah waana inay muujiyaan khatarta gaarka ah ee ay daboosho. La soco xitaa haddii aad si buuxda u haysato caymiska dhammaan khataraha, waxaa laga yaabaa qaar ka mid ah khasaarooyinka inaysan daboolin. Hubso inaad si qoto dheer dib ugu eegto qaybta ka-reebitaanka sheegashada ee siyaasaddaada si aad u hubiso sababta aan khasaarahaaga si cad aan looga reebin daboolida caymiska.

Haddii uu jiro is-khilaafid ku saabsan hishiis-kagaarida sheegashada, weydii shirkadda luqadda qoraalka gaarka ah ee gudaha siyaasadda ee ku saabsan waxa la isku-heysto.

Adiga iyo shirkadda caymiska ma si kala duwan ayaad u fahamteen siyaasadda? Weydiiso sharraxaad qoraal ah oo faahfaahineysa sababta diidmada iyo luqadda siyaasadda ee gaarka ah ee darteeda loo diidayo sheegashada.

Ha ku deg degin heshiis-gaarka. Haddii soo bandhiga ugu horreeyay ee ay sameysay shirkadda caymiska uusan la mid aheyn waxa aad fileysey, isu diyaari inaad la sameyso wada-hadal/gorgortan si aad u hesho hishiis-gaar caddaalad ah.

La xiriir Waaxda Ganacsiga

Hadii aadan u xalin karin khilaafka si aad ugu qanacdo, waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Adeegyada Macaamiisha ee Waaxda Ganacsiga ee Minnesota si aad u weydiiso su'aalo ama aad u xereyso/faylgareyso cabasho. Shaqaalaha xarunta waxay ka shaqeeyaan xallinta iskhilaafka dhex mara macaamiisha iyo shirkaddaha caymiska si aan ahayn rasmi. Waxaad kala xiriiri kartaa Xarunta Adeegyada Macaamiisha adigoo wacaya **(651) -539-1600** ama **(800) 657-3602.** Intaas waxaa sii dheer, waxaad u faylgarayn kartaa cabasho Waaxda ama ugu diri kartaa emayl Waaxda consumer.protection@state.mn.us.